


MUSQULO LOO DHANYAHAY/LOO SIMANYAHAY

Gaar ah • Xirmaya • Ammaan ah



*Sawirradani waa musqulaha iskuulka
Sare ee Senior High School (2017)*

MUSQULO LOO DHANYAHAY/LOO SIMANYAHAY

Gaar ah • Xirmaya • Ammaan ah

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay dib-u-cusboonaysiin ku samaynayaan dhammaan musqulaha ku yaalla iskuullada ay ka socoto dib-u-cusboonaysiin dhinaca dhismeyasha ah. Musqulahan cusub waxay noqon doonaan kuwo gaar ah, ammaan ah, oo qofku uu soo xiran karo. Dhammaan ardayda, lab iyo deddigba way isticmaali karaan musqulahan maadaama oo musqul walba ay gaar u go'antahay leedahayna albaab u gaar ah, waxaa la wadaagayaa meelaha gacmaha lagu dhaqdo oo kaliya.

Gaar ah

Musqul kasta waxay leedahay oo gaar u ah:

- Darbi iyo albaab dhulka ilaa saqafka is-haya.
- Marawaxad iyo nal is-daaraya marka qofku galo musqusha.

Ammaan ah oo xiran

- Si sahlan ayaa loola socon karaa oo loo ilaalin karaa musqulahan cusub:
 - Ardayda iyo shaqaalaha isticmaalaya marinnada ayaa si sahlan u arki kara aagaga guud ee la wadaago ee musqulaha oo loo sameeyay si waasaca oo leh irriddo waaweyn.
 - Musquluhu waxay ku yaallaan meel cagtu ku badantahay oo mashquul ah.
 - Meelaha la wadaagayo ee gacma-dhaqashada waxaa ku xiran kamarado duubaya.
- Musqul kasta waxay leedahay albaab xirmaya oo kala sheegaya in lagu *jiro* iyo inay *faaruq* tahay.
- Macallimiinta dugsiyada hoose waxay haystaan fure ay ku gali karaan musqulaha lacalla haddii ay xaalad degdeg ah dhacdo si ilmaha loo caawiyo.

Maxaa is-baddalay?

- **Asturnaan badan:** Musqul kasta waxay leedahay albaab xirmaya oo kala sheegaya in lagu *jiro* iyo inay *faaruq* tahay. Dhinaca gudaha ee albaabka musqusha wuxuu ku tusinayaa calaamad ay ku qorantahay *way-xirantahay* ama *ma-xirna*.
- **Dhammaan ardaydu lab iyo deddigba si siman ayay u isticmaali karaan musqulaha:** ardayda oo dhan, lab iyo deddigba way isticmaalin karaan musqulahan maadaama oo musqul walba ay gooni u go'antahay leedahayna albaab u gaar ah, waxaa la wadaagayaa meelaha gacmaha lagu dhaqdo oo kaliya. Dugsiyada dhexe iyo kuwa sare, waxaa laga yaabaa in macallimiinta iyo ardayduba isla isticmaalaan musqulaha.
- **Ma jiri doonaan musqulaha istaagga lagu isticmaalo (urinals).**



SOMALI

Facilities Department • 1930 Como Avenue • Saint Paul, MN 55108

Ph: 651-744-1800 • Fax: 651-290-8362 • facilities@spps.org • Web: spps.org/Page/34076